

OFFICIAL

Dadka degan
Jaran jarada loo raaco ee Collingwood
COLLINGWOOD

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo dirayaa inaan kula socodsiiyo halka ay marayaan howlihii dhismeyaalka iyo barnaamijka dib loogu dhisayay saraha dhaadheer ee ay Homes Victoria wadeen.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Tani waxay ka dhigan tahay inaan hadda 9 xaafadood ka bixinayno guryo ka wanaagsan, ka amni fiican sidoo kalena ka raaxo badan kuwii hore guryahaas oo la siinayo dadka hada meesha degan iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba. **Warka maanta la shaaciyay ma saameyn doono dhismaha aad degan tahay ama gurigaaga.**

Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028, waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon inta ay socdaan howlaha dib-u-dhiska.

Waxaan guryo cusub ka dhiseynaa meel goobta ka ag dhow si aan u taageerno qoysaska dib-u-dejinta loo sameynayo

Guryo cusub oo tayo leh ayaa durbaba laga bilaabay in laga dhiso meel goobta ka ag dhow si ay uga taageeraan dadka meesha degan fursadaha dib-u-dejinta. Waxaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan waxaana ka mid ah:

- Essex Street, Prahran
- Simmons Street, South Yarra
- Barak Beacon, Port Melbourne
- Holland Court, Flemington

In guryahan la qaboojiyo lana kululeeyo waa ay ka sahlanaan doonaan kuwii hore, dadka ay ku adag tahay dhaqdhaqaaqana way u fududaan doontaa, waxay kaloo lahaan doonaan amni aad u sarreeya, iftiin iyo hawo ay guyaha helayaan intaasna waxaa usii dheer inay leeyihiin balakoono iyo qolal kuu gaar ah oo dharka lagu dhaqdo.

Xog ku saabsan barnaamijka dib-u-dhiska

Saraha dhaadheer ee Melbourne xilliyo hore laga dhisay waxaa lagu beddeli doonaa guryo cusub oo buuxiya heerarka casriga ah ee raaxada, gelitaanka, iyo koronto dhaqaaleynta.

Marka dib loo dayactiro dhismeyaalkan, waxaan xaqiijinaynaa in dadka degan guryahaas ay ku noolaan karaan guryo ammaan ah, raaxo leh, oo ku habboon baahidooda hadda taagan iyo tan mustaqbalkaba.

Ma jiri doonto dib-u-dejin loo sameyn doono dadka degan saraha dhaadheer oo bilaaban doonta bisha Janaayo 2028 ka hor.

Nagu xirnoow oo la soco wixii soo kordho

Waan kula soo socodsiin doonaa wixii soo kordha marxad kasta oo mashruuca ah. Waxa kale oo aad booqan kartaa websaydkeena homes.vic.gov.au si aad u aragto waxa howlaha aaggaaga ka socda aadna isku diiwaan geliso si aad u hesho wixii war u dambeeyay ee soo kordhay.

Mahadsanid

Simon Newport

Madaxa Fulinta

ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au

